Waa maxay barafka ammaanka?

Runtii wax sidaas ah ma ah, haddii aad barafaka dibadda u baxdid u diyaargarow in aad barafka ku dhacdid, barafku 100% ma aha mid ammaana. Waxaad qiimayn kartaa xoogga marka aad eegtid. Xoogga waxa lagu saleeyaa waxyaabo badan — biyaha intii ay hoos u dheeryihiin barfka hoostiisa, cabbirka qarada biyaha, naqaska biyaha iyo qul-qulka, qaybinta culayska barafka dushiisa, iyo xaladaha cimilada deegaanka ee xilliga oo aad egtid.

Ilaa 2000, cel-celis ahaan 4 qof ayaa ku dhimatay shilalka la xariira barafkaa!

Markasta xiro qalab sabbaynaya shaqsiga oo la oggoladay (jaakadda nolosha) dharkaada qabowga hoostiisa marka aad barafka ku soconaysid. Laakiin marna ha xiranminta gaaroga aad ku jirtid.

Ogow xaaladaha cimilada iyo saadaasha deegaankaada inta aadan isku biimayn qaboobaha.

MINNEAPOLIS EMT FIRE RESCUE

www.ci.minneapolis.mn.us/fire

Xiriir la leh

MINNESOTA PUBLIC SAFETY STATE FIRE MARSHAL

www.fire.state.mn.us

AMMAANKA

BARAFKA

Maalin kale ee artika lajoogoc...

Maxan samayn karaa?

Xiro dharka qabowga oo hagaagsan oo ay ku jiraan, saddex lakab oo wax celiya, kabaha buudka xooggan oo qabatin fiican leh, aaladda sabbaynta ee shaqsiga.

Hubi xaaldaha cimilada lagu jiro iyo heerkulka, waxa dhici karta in toddobaadkii hore uu barafku ammaan ahaa, laakiin maantay aanu ahayn!

Waydii waxa ku saabsan cimilada lagu jiro meelaha dalxiiska iyo dukaamada xayaysiiska. Waxay ogaan karaan khataraha dhaca qaababka hawada ama dhaqamada meelaha aan ammaanka ahayn. Fiiri wax meel yaal ama halisa inta aadan barafka u bixin.

Qorshe samayso waqtiga kugu soo fool leh.Ogow wax aad samaynaysid haddii aad doonaysid in aad horumar gaarto. La wadaag dadka ku wehliya oo u sharrax adegsiga aalad kasta oo lagu badbado oo aad haysato. Ku dhiiri gali dadka oo dhan in ay qaataan, xarig, bir dhuuban oo barfka lagu dalooliyo iyo aaladda sabaynta si aad naftaada iyo dadka kula socda aad ku badbaadisid.

Waa side haddii aan barafka ku dhaco?

Waxaad maqlaysa shanqar waana dhacaysaa. Isla markiiba waxad aad arkaysaa adiga oo quusay biyo aad u qabow oo markiiba saameeyay dreemayaashaada waqtiga. Ka taxaddar in aad biyaha qaadatid oo gacmahaada fidi si aad isku-cekllisid iyo fududee quusiddada. Is-deji, furo qalabkaada badbaada, oo la soo bax qorshahaada.

Gadaal isku rog dhinicii aad ka timid gacmacaadana hortaada u fidi si culayskaada aad u kala baahisid haddi aad haysitid birta barafka qalab af wax jara leh si fiican ugu garaac barafka. Lugahaada si joogta ah ugu haraati adigo oo xagga kore isku soo riixaya. Markii aad bannanka timaadid, gadaal isku qabo kana fogow godka, adigoo hadba inti aad awoodi kartid culaabtaada kala baahinaya.

Si ammaana barafka uga bax oo si deg-dega is-kululee. Dharka iska bixi marka aad heshid dhar qallalan ama hoy diiran.

Waxa dhici karta in aad arga-gax qaadid ama ay kula soo gudboonaato xaalado cabsi leh, sidaas darted islamarkiib raadso gargaar caafimaad.

Ka waran hadii qof kale uu dhaco?

Marka hore wac 911 si la idiin caawiyo. Laga yaabe in qof agtaada jooga uu wato telefoonka gacanta.

Godka ha kicin! Ma caawi kartid haddii qudhaada aad dhibane noqotid. Raac tallaabooyinkan:

Wacdi – ku qayli dhibanaha. U micnee sidi uu isugu gurman lahaa, una hubi in macaawimo imaanayso.

Wacdi – haddi aad ammaan ku soo gaari kartid dhibanaha masaafo agtiisa, sii dhibanaha shay sida xarig oo kale, jaranjaro, ama waayarka lammaanaha gawaarida lagu kiciyo. Haddii qofku uu bilaabo inu ku jiito, xeji shayga markalan isku day.

TUUR – Hal mar ku tuur dhibanah xarigga dabadiisa ama shay sabbaynaya. U sheeg dhibanaha in uu xarigga isku xiro inta aanu qabawga haleelin siina daciifin. Haddii la heli karo aalaadda sabaynta, u tuur una sheeg inu qaato inta aanay ka lumin awoodda qaadashada.

SEEFKA DOONTA – Raadi doon fudud oo barafka hortaada ah looga gudbo. U riix godka qarkiisa, qabo doonta adigo dhibanaha riixaya qaansada korkeeda si dad kale kuu caawiyaan dhibanhana loo badabaadiyo.

SOCO – Raadi gargaar kale. Gurmadka geesi niyad wanaagsan hasayeeshe aan tababarnayn mararka qaarkood waxay keentaa laba dhimasho. Si lagu caawiyo wac 911 dhibanahan u xaqiiji in gurmad soo socdo weydiisana in uu halgamo si uu u noolaado. Naftaada ha ku biimayn in aad badbaadisid xayawaanka dad-la-noolka ama xayawaan kale.

Masuuliyadda Shaqsiga

Ku kaxaynta gawaarid barafka dushiisa?
Isku diyaari inaad deg-deg uga boodid! Suunka gaariga fur hoosna isku geddi daaqadda si aad xawli u gelisd baxsigaada.

Kululaynta gurigaada barafka leh? Ku hay waxyaabaha guban og meel ka fog agagaarka kululeeyahaaga goobo ah saddex cagood oo habab hawo fiicani leh.

Kulligeen waxay masuuliyadi naga saarantahay in aan badbaadino nafteenna iyo kuwa nagu hareeraysan naftooda. Dhigidda tusaale wacan, u dhaqanka si masuuliyadnimo waxy noo oggolaanaysaa in aan ku raaxaysanno hawlaheena bannaanka khatar la'aan.